

SUURAT AL-KAWTHAR:

*Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud
iyo mid gaaraba Naxariista.*

- 1. Annagaa ku siinnay Nabiyow Waadi Janno (iyo khayr badan).**
- 2. Ee u tuko Eebahaa dartiis, waxna u gawrac.**
- 3. Ruuxii ku necebna waa mid cidhib beelay.**

Qur'an 108: 1-3

Sharaxda Suurrada

Eebe wuxuu ugu nicmeeyay Nabigiisa Muxammad (Nabadgallyo iyo Naxariis Korkiisa Eebe ha yeelee) Waadi Janno, wuxuuna Faray in shukri dartiis uu u tukado Salaaddana daa'imo, waxna gawraco.

Wuxuuna u sheegay in ruuxii la collooba uu cidhib beeli.

Ibnu Cumar wuxuu yidhi: waxaa Eebe Nabiga siiyay Wabi ku yaal Jannada oo labadiisa dhinac dahab iyo Fiddo yihiin, oo Jowhar daadin, Biyihiiisuna ka cadyihii caano, kana macaanyihii malab.

Waxaa wariyay Tirmidi